

KAADI CESHAD LA'AAN MAALINTII AH

Waraq macluumaad oo ka socoto Akadeemiyada Enures ee Swiidhan,
www.svenskaenures.se

Dhibaataada kaadi ceshad la'aanta ee carruurta wey ka badantahay inta dad badan ay filayaan. Kaadi ceshad la'aan maalintii ah waxaannu ula jeednaa kaadi fakasho canug shan sano ka weyn ku soo noq-noqota isagoo soo jeeda. Carruurta sideeda kale caafimaadka qabta ee shan jirrada ah shantii ka mid ahba mid ayey ku adagtahay in uu isku celiyo, carruurta da'da dugsiga ku jirtana (6 - 15 jirrada) todobadiiba mid ayey kaadidu ka fakataa maalintii iyo/ama habeenkii.

Maaheyn waqti aad u fog goortii la aaminsanaa in haddii aysan canugga kaadidu uga go'in da'da la rejeynayo in ay uga go'do ay sababtu tahay dhibaato maskaxda ama bulshaynimada la xiriirta. Marar dhif ah waxaa laga yaaba in ay sidaas tahay, laakiin sababta ugu weyn ee kaadi fakashada carruurta sideeda kale fayow waxay u badantahay in ay la xiriirto bislaashada nidaamka dareemayaasha kaadi heysta xukuma. Waxaa sidoo kale laga hadlay xafaayado "aad u fiicfiican", tuunji la'aan iyo in jawiga musqulaha ee dugsiga oo aan wanaagsaneyn ay adkeyn karaan, dibna u dhigi karaan karaanka canugga ee xakameynta kaadi heysta.

Carruurta dhibaato weyn ayey kaadi ceshad la'aantu ku tahay waxay wax walba ka hor carruurta sii yar-yar ee dugsiyada ku keentaa kalsoon darro. Sidaas awgeed xitaa haddii ay khataraha xagga caafimaadku ay badanaa yaryihiin waa in baaritaan iyo daweyn leysku casuumaa. Qaab la maro oo caadi ah marka baaritaan la sameynayo waa in guriga meel lagu qoro marka uu canuggu kaadinayo, la cabbiro inta uu kaadiyay, dhowr maalinne meel lagu qoro waqtiga ay kaadi fakashadu dhaceyso (wax loogu yeero kaadi-xasuus-qor ama diiwaan kaadi). Marka dhakhtarka la soo booqanayo waxaa muhiim ah in la sharraxo hannaanka "kaadida" canuggu sida uu u egyahay. Waxa ugu muhiimsan marka xagga caafimaadka laga eego waa in la baaro in ay canugga ku adagtahay in uu kaadi heysta faarujiyo. Arrimo muhiim ah oo ay tahay in la ifiyo: Ma adagtahay in kaadida la billaabo, ma in uu canuggu ducdaa ama uu caloosha riixo si ay kaadidu uga soo baxdo, si ku noqnoqosho ah ayuu canuggu u kaadiyaa mase si kaadi isu ururtay ah, kaadi gemiddu ma daciifbaa, waqti dheer miyey qaadataa in uu kaadiyo? Kaadi si joogto ah u tifqeysa waa tilmaan kale oo digniin ah, sidoo kalana haddii ay fakaneyso marka uu canuggu wax xoog saarayo. Marka calaamadaha nuucan ah ay jiraan waa in mar walba si sax ah wax loo qabtaa hadii ay wax ka qaldanyihiin kaadi mareennada xaggooda sare iyo kilyaha. Sababta ugu badan ee kaadi fakashada ee carruurta sidooda kale caafimaadka qaba waa kaadi hays welwelsan oo dooneysa in ay iska bixiso in yar oo kaadi ah taasoo ay la socoto in canugga ay ku adagtahay in uu waqti fiican fahmo tilmaamaha kaadi heysta.

Marka dhakhtar la soo booqdo waa in kaadi leyska qaadaa si meesha looga saaro caabuq kaadi mareen ee laga yaabo in uu jiro. Meelo badan waxaa sidoo kale lagu sameeyaa wax loogu yeero cabbiridda qulqulka taasoo ka dhigan in marka ay canugga kaadidu qabato uu ku kaadiyo wax loogu yeero qulqul-kaadi-cabbire, run ahaan waa si caadi ah loo kaadiyo laakiin musqul kuwa kale ka duwan lagu kaadiyo. Marka baaritaan la sameynayo waxaa kaadida lagu diiwaan gelinayaa warqad leh xagal. Xagasho waxay macluumaad ka bixineysaa xawaaraha qulqulka kaadida, in qulqulku uu joogto yahay ama in uusan si siman u socon. Waxaa intaas dheer in xaddiga kaadida la kaadiyay la diiwaan gelinayo iyo inta waqti ah ay kaadidu qaadatay. Markaas ka dib waxaa lagu kaadi heysto in ay faaruq tahay lagu baarayaa farsamada sawirka gudaha muujisa. Maadaama uu canuggu marka ugu horreysa uu badanaa

waxa isweydiinayo oo uu sidaas darteed yara iska adkeynayo in uu ku kaadiyo musqul kuwa kale ka duwan waxaa habboon in qaabka waxa loo sameynayo lagu celceliya 2-3 jeer.

Daweynta ugu horreysa waa waxa loogu yeero tababarka kaadi heysta. Ula jeeddada laga leeyahay daweyntu waa in uu canuggu ka ''adkaado'' kaadi heystiisa, taasoo ka dhigan in canugga lagu dhiirri geliyo in uu mas'uuliyaddiisa qaato, laakiin isagoo taageero ka helaya dadka ku hareereysan iyo hey'adaha caafimaadka. Iyadoo la siinayo macluumaad carruurta loogu tala galay oo ku aaddan sida ay kaadi mareenku u shaqeyso waxay keenaya in ay kaadidu ka fakato iyo iyadoo si wada jir ah canugga loola giijinayo qaababka la raaco ee kaadida (in la kaadiyo waqtiyo la go'aamiyay) carruurta badankooda kaadidu wey uga go'daa. Mararka qaarkood wey fiican kartaa nidaamka kaadi heysta loo sameynayo lala siiyo sidoo kale dawo dejineysa kaadi heysta oo ka dhigeysa in ay qaaddo xaddi kaadi ah oo inti hore ka badan (antikolinergika).

Akadeemiyada Enures ee Swiidhishka iyadoo loo marayo Gunilla Gladh Mattsson